

Maalin dhoweyd oo hadda toddobaad laga joogo, oo aannu annagoo dhegeysannay galabnimo BBC-da, ayaa Abwaan aannu rafiiq nahay oo ReerJabbuuti ah la na yidhaahdo Cumar Daahir Cabdi, kuna magacdheer CumarKuul waxa uu wax iga weyddiiyey warar aad u naxdin badan oo foolxun oo nagaga soo kordhay Kooxdii Kunka Maalmood la agabbarayey ee affarta beynujaho ka caanka noqodtay.

Cumar iima tudhin oo waxa uu su'aalaha igu weyddiiyey goob ilyartu isqabsadtay, aniga na, sida u caadada ah oo inta badan ku dhacda taageere koox liid ah, ayaa waxa igu dhacay wejigabax uu malaha qof aan Soomali ahayni la go'i lahaa.

Hadda ba, anigoo, wax nagu khasbay mooyee, caloolyowga la qaba malaayiin qof oo inkasta oo aanan ka talshan, misna isku aragti ka nahay kooxdaas dhoobdhoobka ah, ayaan gacaliyahay Cumar ugu warcelshay heestan oo markuu akhriyey kaddib uu magacceeda soo bixiyey abwaan/dhaqanyahan Soomaaliyeed oo qurbaha joogaa.

SIRTA CALANKA LAGU HELO

Cumarow¹ ciyaaruhu
Ka sogkow calmaantiyo
Cidda badisay sharaftay
Goobta kala carrawdiyo
Caafimaadka laga helo,
Haddii aanay cawarayn
Edebtiiyo cibaadada,
Carbis ruuxxa agabbar
Iyo waa caqliga tabo
Curintiisa koriyoo
Socodsiiya carummada
Uu dhimir cawaansado!

Dhugtan iyo cargaagtamid
Labo kooda cudud lihi
Legdankuu ku ciilbaxo
Ama cararka tawda ah
Cagohoo wax laga dayo
Deleb lagu caweysimo
Caymanbadan yibtiyo jagi
Kol ay tahay carruuruhu
Saaladay ciyaaraan
Mid kasta ba culuun iyo
Cashar baa ku laabudan!

Dhaar iyo cilaaq iyo
Hayska ciid badnaadtoo
Kan yaqaan ha cawlmoo
Ha ku ciddiyabbeelee
Shaxdu waa ciyaar dhab ah,

Waa mid coommir mooyee
HoggaDhuxul cayaayirid
Sahal looga caymadin
Oon ciyaarciyaartaas
Curin jaraha lagu dhalin!

Yaalaa ciyaaraha
Kasmo iyo cilmaa haga
Caadooyin gaariyo
Xeerar celiyeheeda ah
Oo celshoo kan coonmara
Caabbiyoo qabtaa dhigan!

Tan kaleeto Cumarow
Curadow mar ila eeg
Cagta kubadda lagu wado
Iyo camalladeediyo
Sirta calanka lagu helo.

Inkastoy haddeer cuud
Faran caydhsi ay tahay
Aadmi lagu curaartoo
Haddaan bixinno Ciid iyo
Caska geela jooga ba
Uu Carabka Siidaan
Ka carbuun korreeyoon
Toban wegen cagtiisiyo
Ciddidiisa kadin goyn,
Misna waa ciyaar sare
Waa dheel cuddoonida
Faltan iyo cibaaro leh!

Bedka sumado caan iyo
Gegideeda Cumarow
Wax ku yaal calaamado
Jiidtimo caddaanoo
Dalka cidhifyadiisiyo
Xuduudaha la caymada!

Ciyaartoyga tobanka ah
Ineytaha cubtiisiyo
Camal madhashadiisiyo
Caynkuu u doortiyoo
Xirrib weeye cugashadu
Kansho garad cawaansi leh!

Cagta lama wadaagee
Xiddig waliba curintiyo
Xirfadduu ku caanyahay
Haddaan lagu ciyaarsiin
Isu dhiib celaancelin
Gocostaa cugkuran aan
Cidda dhalin og loo tebin
Digdig iyo cagtaa rogan
Iyo ceeb ka soo qaad
Cassar lala huleeloo
Afka ciidda lala galo!

Way dhacdee cajebeheed
Koox difaaccu cilin yahay
Kan u culusi Kow yahay
Weerarku na curyaan iyo
Uu cagoole jaban yahay
Oy labo caweerani
Cidhifyada ka dheelaan
Tobnaad uu cawaran yahay
Kabtanku na ku' caalgabay
Coon gaboobey uu yahay,
Caqlixumidu yaab lehe
Ma cid eegaysaa jira
Inay soo celshaan guul!

Sow ma aha caaqnimo
Inay sida Cukaashiyo
Cabdoo iyo Dayuufiyo
Ay cirkaas rag laale'eg
Ciyaar ugu badheedhaan?

Kan cugtaa ka caaqsane
Caaqiibabbeel iyo
Sow ma aha caalwaa
Wax caynkaas ah goortii
Wiil yar oo carraabo ah
Cagabboodhle hadda yimi
Mar ba culug u duubiyo
Kala calicalayniyo
Cad mariil ah iyo dhoys
la caleemasaaroo
Cidla' iyo bannaaniyo
Hadur loo cimaamado?

Caku! camalsilloonida

Dar is wada cugfaayoo
Isku cayman baydgo'an
Oo is wada canaadoo
Mid ba uu mid caydhsado
Oo kala cadgoosida
Iyo durid cadiigsiga
Cidi yaanay lulan iyo
Candhablaggoynta mooyee
An is cawaansi ba aqoon
Sow curadka baaqdiyo
Ohey! cidhibxumaanshaha
Kama liidto caalwaa
Caymin-caalle ka sugayaa?

Yaa yidhi col iyo tùùg
Iyo dùùl cibaarada
Mid ba uu mid soo cunay
Oo isu wada cadaawe ah
Cadaw aan is bixinayn
Cunsur dhiigqabeenoo
Cawro iyo habaar qaba
Intii baas carrada jirey,
Ayaw ciidanshoo qaran
Calankiisa hanan kara?

Allow sahal ciyaaruhu
Haddii aan caqligu hagin
Curfigiyo aqoontiyo
Cilmi aanu jaangoyn,
Jahligaa u cadowoo
Cidda daawanaysaa
Haddii ay cawaan tahay
Maxas iyo ciyaal tahay
Maadto cududan ay tahay
Mar mar bay ciqaab tahay
Colaad iyo dab ay tahay
Oy dagaallo curisaa,
Ee Rabbow col iyo nacab
Iyo cadaw hannoo kadin!

¹ Cumar Daahir Cabdi “CumarKuul” – waa abwaan ReerJabbuuti ah.